



Minnesota
STATE COLLEGES
& UNIVERSITIES

(Machadyada iyo Jaamacadaha
Gobolka Minnesota)

Jaamacadda inta ayaa laga bilaaba: Tillaaboyinka la'isugu diyarinayo

Tacliinta jaamacadda waxa ay kuu diyaarinaysaa mustaqbal naajix ah. Ha u malaynin in aadan awoodi karin, laalkiin waad awoodi kartaa. Gargar lagu fidiyo iyo kharashka waxbarashada jaban ee laga bixiyo 32da Machad iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota ayaa suurtagalinaya waxbarashada heer jamacadeed.

Halkan waxa ku qoran tillaaboyinka bilowga ah ee loo marayo jaamacadda:

- 1. Soo qaado fasallo kuu diyaarinaya waxbarashada jaamacadda.** Ardada iyo qoysaska waxa ay bilaabi karaan qorshaha jaamacadda xita intaa uusan bilaabin dugsiga dhexe. Kulan la yeelo lataliyaha dugsida si aad u ogaato maaddooyinka lagaa rabo inaad qaadatid. Maaddooyinka lagu talinayo in dugsiga sare lagu qaato:
Ingiriis – 4 sanadood
Xisaabta – 3 sanadood
(4 sanadood ayaa fiican)
Sayniska – 3 sanadood
Waxbarashada bulshada – 3 sanadood

Jaamacadaha gobolka ayaa doonaya in la soo qaato maaddooyinkan kore iyo labo sano hal luqad ajnabi iyo hal sano ee farshaxanka muuqda iyo bandhigga fanka.

Qaadashada maaddooyinkan fursad ayay kuu siinayaan in aad xaq u yeelatid helista gargaar dheeraad ee federaal ah ee waxbarashada loo fiidiyo.



- 2. Ku dhaqaaq dhabbaha fiican ee waxbarashada.** Buugagga la akhristo iyo la sameeyo laysliyada xirfadaha qorista. Su'aalo weydii marka aadan wax fahmin. Waalidka ama qofkale oo masuul ah ha ka caawiyo daraasoyinka guriga. Wakhtigaaga u qorshayso si aad daraasada ku dhammaysid wakhtiga lagu qabtay.
- 3. Indha indhee xirfadaha shaqoyinka iyo fursadaha jaamacadda.** Soo booqo xaruntaada xirfadaha shaqoyinka ama latalinta akhbaarta ku saabsan xirfadooyinka shaqada iyo machadyada iyo jaamacadaha.

Haybso akhbaarta jaamacadda la xariirta. Wac xafiiska oggolaanshaha ee jaamacadda weydiisona warqado faallo gaaban ka bixinaya machadyada iya jaamacadaha aad doorbidaysid. Qorsheyso safar aad mar ama dhowr jeer ku booqatid jaamacadda.

- 4. Qaado imtixaamka ACT ama SAT.** Haddii aad ku talajirtid inaad aadaysid jaamacad affar sanadood ah, waa inaad qaadatid imtixaamka ACT ama SAT. Mid kamid ah imtixaamadan isku habka ah ayaa shardi ah in la qaato si lagu galo jaamacadda aafarta sanadood. Lataliyaha dugsigaaga sare kala xariir wakhtiga imtixaanka ay galayaan kuwa dhigta darajoyinka 11aad ama 12aad.

ACT ama SAT looma baahna marka la galayo macdhadka labada sanadood. Kaddib marka ay jaamacadda ku aqbasho, waxaa la qaadaya imtixaam kale kaaso lagugu aaddinayo fasallada ku habboon marka la eego heerka xirfadahaaga akhriska, qorista iyo xisaabta.

- 5. Jaamacadda dalbo inta aad dhiganaysid darajada 12aad.** Jaamacadda affarta sanadood ah, waxa aad jaamacadda dalbataa xilliga dayrta ee darajada 12aad. Jaamacadda affarta sanadood, waxa aad dalbataa wakhti kasta ee ka horreyxa xilliga bilowga sanad dugsiiyeedka barkiisa. Laakiin, haddaad dalbashada hore waxay ku siinaysaa fursad fiican ood ku gasho barnaamijyada iyo fasalada daraasadaha aad rabto.



- 6. Dalbo gargaarka waxbarashada loo fidiyo.** Waxa aad buuxisaa arjiga la yiraadho Free Application for Federal Student Aid, ama FAFSA, Janaayo 1da inta lagu jiro marka lagu jiro darajada 12ad.

Machadyada iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota waa kuwo jaban. Kharashka iyo ujrooyinka dhexaasda sanadkii ku baxa waa \$4,565 sanakiiba marka la dhinganayo machadyada jaalliyadaha ama kuwa farsamada iyo \$6,083 kuwa jaamacadaha gobolka. Kharashka badankiisa ama isaga oo idil waxa kabi kara gaargaarka laguugu fidiyo waxbarashada aad xaq u yeelatid. Waxa aad bilaabi kartaa machadka labada sanadood kaddibna waxa aad u gudbi kartaa jaamacadda affarta sanadood. Waxa aad qaadan kartaa barnaamijyada laga bixiyo internetka. Waxa aad bilaabi kartaa inta aad dhiganaysid dugsiga sare adiga oo qaata fasallada jaamacadda adiga oo isku qora barnaamijka Post-Secondary Enrollment Options, ama PSEO. Akhbaar dheeraad ah weydiso lataliyaha dugsiga.

College Goal Sunday (Himilada Jaamacadda Axadda) waa barnaamij qameed ee aqbaar iyo garagaar lacagla'aan ah oo lagu siinayo qoysaska doonaya in ay buuxiyaan arjiga la yiraahdo Free Application for Federal Student Aid, ama FAFSA, foomanka federaalka ee laga rabo ardada codsanaya gargaarka waxbarashada (financial aid), sida deeqda iyo daymaha. Dhammaystiridda FAFSA waa tallaabada ugu horreysa uguna muhiimsan ee u qalmidda gargaarka.

Bandhigyada Minnesota's College Goal Sunday waxa ay gobolka ka dhacaan dhowr taariiqyo inta u dhaxaysa Janaayo 1 iyo Maajo 1 sanad walba. Bogga interneta ee Minnesota College Goal Sunday, www.mncollegegoalsunday.org, ayaa laga helaya taariqaha ay dhacayan bandhigyada 2009. Bogga internetka ayaa had iyo jeer wax laga baddalaya inta lagu jiro xilliga College Goal Sunday, fadlan si joogta ah ula soco isbaddellada si aad ku heshid goob adiga kuu dhow.

Si aad ku ogaatid liiska taxana laga rabo in ay waalidka iyo ardada horay ugu soo qaataan bandhigga, gala www.mncollegegoalsunday.org.

Meelaha ay ku yaallan Machadyada iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota

32da machad iyo jaamacadaha gobolka waxa ay waxbaraan arda kasta ah oo ku jira barnaamijyo lagu helayo aqoonsi, shahaadooyin jaamacadeed iyo shahaadooyinka aqoonta sare. Waxa aad ka heli kartaa meel adiga kugu habboon.

Su'aalo?

Wac 1-888-345-2537

ama e-mail u dir

start.here@so.mnscu.edu

Wax dheeraad ah ka baro waxa ku saabsan Machadyada iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota iyo isudiyarinta jaamacadaha ee laga galayo:

www.mnscu.edu/students



Minnesota
STATE COLLEGES
& UNIVERSITIES

(Machadyada iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota)

Machadyada iyo Jaamacadaha Gobolka waa kuwo shaqada ku bixiya Fursado Loo Simanyahay shaqada iyo waxbaridda.

